

# Ma lumisay saacadahaha shaqada, xanuunsan tahay ama shaqo la'aan ma kugu dhacday sabab la xariirta korona fayras?

Boqolaal kun oo dadka reer Washington ah ayaa hoos loo dhigay saacadahooda shaqada, xanuunsan ama shaqo la'aan ku dhacday sabab la xariirta dilaacida cudurka Korona fayras (COVID-19). Waxaad heli kartaan caawimaad adigga iyo qoyskaagu inta lagu jiro masiibadaan. Akhri [Jaantuskaan Gunnooyinka](#) si aad u aragto noocyada barnaamijyada gobalka ee aad heli karto.



## Ma u qalmaa gunnooyinka shaqo la'aanta?

Inaad caawimaad u qalanto waa wax aad u fudud hadda isbadalada ku dhacay heer gobal iyo heer federaal awgood lagasoo bilaabo markuu biloowday fayrasku. Gunnooyin badan ayay heli karaan dad badan, ayna ku jiraan dadka ka shaqeeya shaqooyinka goos-gooska ah, ganacsiga leh ama ah qandaraaslayaasha madaxa banaan ama hoos loo dhigay saacadihii ay shaqayn jireen ama jiran. Fiiri inaad u qalanto iyo in kale [adoo akhrinaaya liiskaan](#).



## Lacag intee dhan ayaan heli karaa?

Way kala duwan tahay, mana heli doontid xaqiiqada si dhab ah ilaa aad codsato gunnada. Sharciga CARES ee dawlada federaalka ah waxaa ku jira \$600 oo dheeraad ah oo asbuuc kasta la siinaayo qof kasta oo u qalma gunnooyinka (marka laga reebo dadka ku jira barnaamijka tababarka).



## Goorma ayaan helayaa caawimaad?

Dalabaadka gunnooyinka shaqo la'aanta ayaa gaaray heerkii ugu sareeyay abid, kooxda ka shaqaysa Washington Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada ee Washington ayaa si adag uga shaqaynaysa boobsiinta waqtiga looga jawaabaayo codsiyada. Waakanaa warka ugu muhiimsan: waxaad heli doontaa dhammaan lacagaha aad xaqa u leedahay, lagasoo bilaabo maalintii aad xaqa u yeelatay. Taasi waxay ka dhigan tahay in haddii aadan awoodin inaad codsato sabab la xariirta inaad la xariiri kari wayday waaxda, waxaa laguusoo celinayaa lacagahaad xaqa u lahayd.



**Ka waran haddii aan joojiyay inaan shaqeeyo si aan u daryeelo xubin ehelkay ah oo qaba COVID-19 ama carruurta ay aysan aadin dugsiiga aysana haysan cid daryeelka carruurta u fidisa?**

Sabab la xariirta in la balaarshay gunnooyinka la heli karo inta lagu jiro faafida cudurka COVID-19, xaalado badan ayaa keenaaya inaad u qalanto gunnooyinka. Tusaalayaasha waxaa kujira:

- Inay qasab kugu noqoto inaad guriga joogto si aad u daryeesho carruurtaada sabab la xariirta in la xiray dugsiyadooda.
- In shirkada aad u shaqayso la xiray, aadana shaqada ku qaban karin guriga.
- Aadan aadi karin goobtaada shaqada sabab la xariirta amarka "Guriga joog, dhawr caafimaadkaaga" shaqada ood ku qabato khadka oonleenaana aysan ahayn dookh kuu furan.
- Hoos loo dhigay saacadahaaga shaqada sabab la xariirta saamaynta cudurka COVID-19.
- Aad tahay shaqaale si goos-goos ah u shaqeeya oo aadan caadiyan u qalmin gunada shaqo la'aanta.
- Aad tahay qof ganacsi iskiis ah leh ama aad tahay qandaraasle madax banaan.



**Anigga ayaa ganacsi ku shaqaysa umana qalmin gunnadamarkii hore. Maxaan sameeyaa hadda?**

Shaqaalaha ganacsiga leh, sida qandaraaslayaasha madax banaan, ayaa u qalma gunnada haddii fayrasku kuu diido inaad shaqayso.

Kahor intaadan codsan, [soo dagso liiskaan hubinta](#), kaasoo kaa caawinaaya shaqada codsiga iyo inaad ka fogaato samaynta qaladaadka guud ee hoos u dhigaaya codsigaaga.



**Waxaan isticmaalay gunnadaydii shaqo la'aanta sanadkii lasoo dhaafay. Wali miyaan u qalmaa?**

Haa, mar kale ayaad u qalmi kartaa in lagu kordhiyo mudada gunada 13 asbuuc oo lagu kordhinaayo sheegashadaadii hore haddii aad wali ku jirto isla sanadka aad gunnada u qalantay.



**Waxaan ahay shaqaale aan sharci lahayn. Ma u qalmaa caawimaad?**

Waa inaad haysataa ogolaansho shaqo ood uga shaqayso Maraykanka si aad ugu qalanto gunnooyinka shaqo la'aanta iyo gunnooyinka shaqo la'aanta ee la balaarshay. Hase yeeshee, aqoonsiga soo galootinimada laguma xisaabinaayo u qalmida gunada barnaamijka Fasaxa Mushaarka Lagu qaato ee Qoyska iyo Caafimaadka ee gobalka ka jira. Sidaas awgeed, haddii aad xanuun daran qabto ama aad daryeelayso qof aad u xanuunsan, barnaamijkaan ayaa ku caawin kara. Xog dheeri ah ka baro [paidleave.wa.gov](http://paidleave.wa.gov) ama [tometiempo.org](http://tometiempo.org).

Gobalka ayaa sidoo kale sameeyay webseet ([coronavirus.wa.gov](https://coronavirus.wa.gov)). loogu talagalay cudurka faafaaya ee Korona Fayras aadna ka helayso ilaha xogta, caawimaad iyo kaalmo inta lagu jiro masiibadaan. [Su'aalahaan Badanaa La iswaydiyo \(FAQ\)](#) ayaa sidoo kale ku caawin kara.



### **Sidee ayaan u codsanayaa caymiska shaqo la'aanta?**

Waxaa jiro laba qaab ooloo codsado: Oonleen ahaan ama khadka taleefanka. Webseetka ([esd.wa.gov](https://esd.wa.gov)) ayaa ah qaabka ugu dhaqsiyaha badan ee loo codsado laguna helo gunnooyinka adoo adeegsanaaya kumbuyuutar wayn ama laabtoob. Waxaad sidoo kale adeegsan kartaa aalada moobilka, laakiin xoogaa way adag tahay inaad qaybaha qaar aragto. Si aad khadka taleefanka ugu codsato wac 800-318-6022.

Kahor intaadan codsan, [soo dagso liiskan codsiga](#).

Dad aad u badan ayaa nasoo wacaaya waqti xaadirkaan, marka waxaa kugu adkaan karta inaad nagu hesho wicitaan saacadaha caadiga ah ee shaqada. Waxaad fursad dheeraad ah u heli doontaa inaad ku codsato khadka taleefanka haddii aad nasoo wacdo kadib 6 p.m. iyo kahor 7 a.m. Haddii codsigaaga la daahiyo, ogoow inaad heli doonto dhammaan lacagaha aad xaqa u leedahay, lagasoo bilaabo maalintii aad xaqa u yeelatay.

Wixii su'aalo guud ah, wac 833-572-8400



### **Maxaa ku jira nidaamka codsiga?**

Nidaamka codsiga ayaa wareer kugu abuurin kara, marka waa muhiim inaad akhrido xogta ku qoran webseetka aadna adeegsato liiska iyo muuqaalada si ay kaaga caawiyaan inaad diyaar noqoto, aad ayay u fududaanaysaa. Waxaa jiro talaabooyin kaladuwan ood u baahan tahay inaad raacdo, haddii aadan caadiyan u qalmina gunnada shaqo la'aanta, sabab la xariirta in shaqadaadu joogto ahayn, aad tahay ganacsade ama aadan shaqayn karin sabab la xariirta in dugsigii carruurta la xiray, waxaa marka hore u baahan tahay inaad codsato gunanda caadiga ah ee shaqo la'aanta si laguugu diido kahor intaadan codsan gunnooyinka la balaarshay ee shaqo la'aanta (oo loogu yeero caawimaada shaqo la'aanta aafadu keentay, ama PUA).



### **Sidee ayaan ula qabsanayaa dhammaan isbadalada dhacaaya?**

Webseetkeena ayaa wax laga badalayaa marka xog cusub soo baxdo. Waxaad sidoo kale iska qori kartaa fariimaha iimeelka oo af Ingiriis lagusoo galinayo webseetka [halkan](#).

[Xog dheeri ah ka akhri esd.wa.gov](https://esd.wa.gov)